

Qoraalka Caddeynaya Xaquuqda uu Leeyahay Bukaanka



Sida bukaanka MNGI Digestive Health, P.A. iyo Xarumaheeda Qalliinka Bukaansocodka ahaan, ayaa siyaasaddan waxaa ay awood kuu siinaysa adiga, oo ah bukaanka, xaq aad u leedahay:

Qoraalka Caddeynaya Xaquuqda ay Leeyihiin Bukaannada Xarunta Qalliinka Bukaansocodka ee Minnesota

Sharci-dejinta Minnesota ee 2004

144.651 Bukaannada iyo deganayaasha xarumaha daryeelka caafimaadka; qoraalka caddeynaya xaquuqda uu qofku Leeyahay.

Qayb-hoosaad 1: **Qasadka sharci-dejinta.** Waa qasadka sharci-dejinta iyo ujeeddada qaybtan in kor loo qaado danaha iyo ladnaanta bukaannada iyo deganayaasha xarumaha daryeelka caafimaad. Ma jirto xarun daryeel caafimaad oo uga baahan karto bukaanka ama deganaha in uu ka tanaasulo xuquuqahan iyada oo uga dhigaysa shuruud ku xiran dhigista xarunta caafimaadka. Mas'uulka ama ilaaliye kasta ee bukaanka ama deganaha ama, marka uu maqan yahay mas'uulka ama ilaaliyaha, qof daneynaya, ayaa raadin kara meelmarinta xuquuqahan isaga oo ka wakiil ah bukaanka ama deganaha. Qofka daneynaya ayaa sidoo kale raadin kara meelmarinta xuquuqahan isaga oo ka wakiil ah bukaanka ama deganaha haysta mas'uul ama ilaaliye isaga oo u soo maraya hay'adaha maamulka ama maxkamadda degmada ee awoodda u leh mas'uulnimada iyo ilaalinta. Inta la sugayo natiijada dacwadda meelmarinta ayaa xarunta daryeelka caafimaadka waxaa laga yaabaa, iyada oo niyadeedu wanaagsan tahay, in ay u hoggaansanto tilmaamaha mas'uulka ama ilaaliyaha. Waa qasadka qaybtan in xorriyadaha diinta iyo kuwa madaniga ee bukaan kasta, oo ay ku jiraan xuquuqda go'aamo shakhsiyeed oo madax-bannaan iyo aqoonta ikhtiyaarada la heli karo, in aan lagu xadgudbin iyo in xaruntu ay dhiirrigeliso oo ay gacan ka geysato adeegsiga buuxa ee suuragalka ah ee xuquuqahan.

Sharaxaadaha

Qayb-hoosaadda 2. **Sharaxaadaha** Ujeeddooyinka qayb-hoosaadyada 4 ilaa 9, 12, 13, 15, 16, iyo 18 ilaa 20 awgood, "bukaan" sidoo kale waxaa loola jeedaa qofka ka helayo adeegyo daryeel caafimaad xarunta qalliinka bukaansocodka.

Qayb-hoosaadda 4. **Macluumaad ku saabsan xuquuqda.** Bukaannada waa in, marka la dhigo, loo sheego in ay jiraan xuquuqo sharci oo loogu talagalay ilaalintooda inta ay joogaan xarunta ama bilow ilaa dhammaadka muddada daaweynta iyo taageerada bulshada iyo in kuwan lagu sharxay bayaan qoran oo la socda ee xuquuqaha iyo mas'uuliyadaha lagu dabaqi karo ee ku dhigan qaybtan. Diyaafadin caqligal ah waa in loo sameeyo kuwa qaba cillado ama naafonimo hadalka ah iyo kuwa ku hadla luuqad aanan ahayn Af Ingiriis. Siyaasadaha xarunta ee hadda, waxyaabihii lagu ogaaday baarista maamullada caafimaadka degaanka iyo kuwa gobolka, iyo sharaxaadda dheeraadka ah ee bayaanka qoran ee xuquuqaha waa in ay helaan bukaannada, mas'uuliyiintooda iyo wakiillada ay doorteen marka si macquul ah looga codsado maamulaha ama hawl-wadeenka u xilsaaran, si waafaqsan cutubka 13aad, Xeerka Hab-dhaqannada Xogta, iyo qaybta **626.557**, ee la xiriira dadka waaweyn ee nugul.

Qayb-hoosaadda 5. **Daaweynta edboon.** Bukaannada waxaa ay xaq u leeyihiin in ay ula dhaqmaan si maamus iyo xushmad leh shakhsi ahaantooda shaqaalaha ama shakhsiyaadka bixinaya adeegga xarunta daryeelka caafimaadka.

Qayb-hoosaadda 6. **Daryeelka caafimaadka ee habboon.** Bukaannada waa in ay xaq u yeeshaan daryeel shakhsi iyo mid caafimaad oo ku habboon kuna saleysan baahiyada shakhsi.

Qoraalka Caddeynaya Xaquuqda uu Leeyahay Bukaanka



Qayb-hoosaadda 7. **Aqoonsiga takhtarka.** Bukaannada waa in ay haystaan ama la siiyaa, iyaga oo qoraal ah, magaca, cinwaanka shaqada, telefoon lambarka, iyo takhasuska, haddii ayba jiraan, takhtarka ka mas'uulka ah isu-duwidda daryeelkooda. Haddii caafimaad ahaan aan lagu talinayn, sida uu qoray takhtarka xannaanaynaya diiwaanka daryeelka bukaanka, macluumaadka waa in la siiyaa mas'uulka bukaanka ama qofka kale ee uu bukaanku magacaabay in uu wakiilkiisa yahay.

Qayb-hoosaadda 8. **Xiriirka lala leeyahay adeegyada kale ee caafimaadka.** Bukaannada adeegyada ka hela bixiyayaasha dibadda waxaa ay xaq u leeyihiin, marka ay codsadaan, in loo sheego aqoonsiga adeeg-bixiyaha. Macluumaadka waa in ay ku jiraan magaca adeeg-bixiyaha dibadda ka yimaada, cinwaankiisa, iyo sharxaadda adeegga laga yaabo in la qabto. Haddii caafimaad ahaan aan lagu talinayn, sida uu qoray takhtarka xannaanaynaya diiwaanka daryeelka bukaanka, macluumaadka waa in la siiyaa mas'uulka bukaanka ama qofka kale ee uu bukaanku magacaabay in uu wakiilkiisa yahay.

Qayb-hoosaadda 9. **Macluumaadka ku saabsan daaweynta.** Bukaannada waa in la siiyaa macluumaadka dhammeystiran ee hadda ah ee takhaatiirtooda ee khuseeya cudurrada laga helay, daaweyntooda, waxyaabaha beddelka ah, halisaha, iyo saadaalinta sida loogu baahan yahay waajibaadka sharciga ah ee shaacin ee takhtarka. Macluumaadka waa in uu noqdaa qaabka iyo luuqadda bukaanka sida caqligalka ah la filayo in uu fahmo. Bukaannada waxaa la socon kara xubin ka tirsan qoyska ama wakiil kale oo la xushay. Macluumaadkan waa in ay ku jiraan natiijooyinka daaweynta ugu waaweyn ee nafaani ama caafimaad iyo kuwo kale ee beddeli kara. Haddii caafimaad ahaan aan lagu talinayn, sida uu qoray takhtarka xannaanaynaya diiwaanka daryeelka bukaanka, macluumaadka waa in la siiyaa mas'uulka bukaanka ama qofka kale ee uu bukaanku magacaabay in uu wakiilkiisa yahay. Dadku waxay xaq u leeyihiin in ay macluumaadkan diidaan. Bukaanku kasta ee la ildaran nooc kastoo kansarka naaska ah waa in si buuxda loogu wargeliyo, ka hor ama waqtiga dhigista iyo inta lagu guda jiro joogitaankeeda, dhammaan hababka kale ee daaweynta wax-ku-oolka ah ee takhtarka daaweynaya uu ogyahay, oo ay ku jiraan daaweynta qalliinka, shucaaca, ama daaweyn kiimiko ama isku-jirka habab daaweyn iyo halisaha la xiriira mid kastoo ka mid ah hababkan.

Qayb-hoosaadda 12. **Xuquuqda lagu diidayo daryeel.** Bukaannada awoodda leh waa in ay helaan xuquuqda ay ku diidayaan daaweyn ku saleysan macluumaadka loogu baahan yahay qayb-hoosaadda 9aad. Xaaladda bukaanka uusan awooddin in uu fahmo xaaladaha balse aanan la go'aamin in aysan awood lahayn, ama marka shuruudaha sharcigu ay xadidayaan xuquuqda lagu diidayo daaweynta, xaaladaha iyo daruufaha waa in uu takhtarka xannaanaynaya si buuxda ugu diiwaangeliyaa diiwaanka caafimaad ee bukaanka.

Qayb-hoosaadda 13. **Cilmi-baarista tijaabada ah.** Oggolaansho lagu wargeliyay, qoraal ah waa in la helaa ka hor inta bukaanka uusan ka qaybgalin cilmi-baarista tijaabada ah. Bukaannada waxaa ay xaq u leeyihiin in ay ka-qaybgalka diidaan. Labadaba oggolaanshaha iyo diidmada waa in lagu diiwaangeliyaa diiwaanka daryeelka shakhsiyeed.

Qayb-hoosaadda 15. **Asturnaanta daaweynta.** Bukaannada waa in ay xaq u yeeshaan ixtiraam iyo asturnaan maadaama ay la xiriiraan barnaamijkooda daryeelka shakhsi iyo midka caafimaad. Wadahadalka, wada-tashiga, baaritaanka, iyo daaweynta xaaladda waa sir waanna in loola dhaqmaa si laga fiirsaday. Asturnaanta waa in la ixtiraamaa inta lagu guda jiro musqusha, qubeyska, iyo waxqabadyada kale ee nadaafadda shakhsiyeed, marka laga reebo sida loogu baahdo bedqabka iyo caawinta bukaanka.

Qayb-hoosaadda 16. **[Qarsoodi ahaanta diiwaannada.** Bukaannada waa in loo ballanqaadaa in si qarsoodi ah loola dhaqmi doono diiwaannadooda shakhsiyeed iyo kuwa caafimaad, waxaa ayna diiddi karaan ama oggolaan karaan in loo siidaayo shakhsi kasta ee ka baxsan xarunta. Nuqullada diiwaannada iyo macluumaadka qoran ee laga helo diiwaannada waa in loo soo bandhigaa si waafaqsan qayb-hoosaaddan iyo qaybta.

144.293 Xuquuqdan ma khuseeyso baaritaannada u hoggaansamidda iyo baaritaannada ay sameeyso Waaxda Caafimaadka, halka loogu baahan yahay heshiisyada lacag-bixinta dhinac saddexaad, ama haddii uu si kale oggol yahay sharciga

Qayb-hoosaadda 18. **Adeegga jawaabta.** Bukaannada waa in ay xaq u yeeshaan jawaab degdege ah oo caqligal ah in laga bixiyo su'aalhooda iyo codsiyadood.

Qoraalka Caddeynaya Xaquuqda uu Leeyahay Bukaanka



Qayb-hoosaadda 19. **Asturnaanka shakhsiyeed.** Bukaannada waa in ay xaq u yeeshaan tixgelin kasta ee asturnaantooda, shakhsiyadooda, iyo aqoonsiga dhaqankooda maadaama ay la xiriiraan ladnaanta bulshadooda, diintooda, iyo nafsiyadooda. Hawl-wadeennada xarunta waa in ay ixtiraamaan asturnaanta qolka deganaha iyaga oo gargaraacaya albaabka ka-dibna oggolaansho wayddiisanaya ka hor inta aysan gelin, marka laga reebo xaaladda degdegga ah ama halka si cad loogu talin karin.

Qayb-hoosaadda 20. **Cabashooyinka.** Bukaannada waa in la dhiirrigeliyaa oo la caawiyaa, bilowga ilaa dhammaadka joogitaankooda xarunta ama muddada daaweyntooda, si ay u fahmaan oo ay u adeegsadaan xuquuqahooda bukaan iyo kuwa muwaadin. Bukaannada ayaa laga yaabaa in ay sheegtaan cabashadooda iyo in ay ku taliyaan isbeddelo in lagu sameeyo siyaasadaha iyo adeegyada hawl-wadeennada xarunta iyo kuwa kale ee ay doortaan, in aanan la xakameyn, la farogelin, la khasbin, la takoorin, ama aarsasho, oo ay ku jirto in loogu hanjabo in la saarayo. Ogeysiiska barnaamijka ama habraaca cabashada xarunta, iyo sidoo kale cinwaannada iyo lambarada telefoonka Xafiiska Cabashooyinka Xarunta Caafimaad iyo gardoonka rugta lagu xannaaneeyo waayeellada ee degaanka iyada oo la raacayo Xeerka Dadka Waayeellada ah ee Mareykanka, qaybta 307(a)(12) waa in lagu dejiyaa meel si cad loogu arki karo.

U hoggaansamidda xarumaha qalliinka bukaansocodka ee qaybta **144.691** iyo u hoggaansamidda ururrada taageerada caafimaadka qaybta 62D.11 waxaa loo arkaa in ay tahay u hoggaansamidda shuruudaha habraaca cabashada gudaha ee qoraalka ah.

Qoraalka Caddeynaya Xaquuqda uu Leeyahay Bukaanka



Xarunta MNGI Endoscopy ASC, Inc. iyo East Metro Endoscopy Center, LLC waxaa aqoonsaday Xarumaha Adeegyada Medicare iyo Medicaid. Xuquuqaha bukaanka Xarunta Qalliinka Bukaansocodka oo dheeraad ah ayaa hoos ku taxan.

§ 416.50 Shuruudda Caynsanaanta – Xaquuqda Bukaanka

ASC waa in ay ku wargelisaa bukaanka ama wakiilka bukaanka xaquuqda bukaanka uu leeyahay, oo waa in ay ilaalisaa oo ay kor-u-qaadaa adeegsiga xaquuqdaasi.

Dhabbe-tusayaasha turjumaadda §416.50

Jaangooyada § 416.50(a)(1): Ogeysiiska Xaquuqda

(1) ASC waa in ay siiyaa bukaanka ama wakiilka bukaanka ogeysiiska afka ah ee xaquuqda bukaanka ka hor taariikhda habraaca, oo ah hab iyo luuqad uu fahmi karo bukaanka ama wakiilka bukaanka.

Jaangooyada § 416.50(a): Ogeysiiska Xaquuqda

(1)[...] **Intaa waxaa siidheer, in ASC ay –**

(i) Ku dhejiso ogeysiiska qoran ee xaquuqda bukaanka meel ama meelo ku dhexyaala xarunta oo ay u badan tahay in ay arkaan bukaannada (ama wakiiladooda, haddii lagu dabaqi karo) sugaya daaweynta. Ogeysiiska xaquuqda ee ASC waa in ay ku jiraan magaca, cinwaanka iyo telefoon lambarka wakiilka hay'adda Dowladda oo ay bukaannada u gudbin karaan cabashooyinka, iyo sidoo kale Mareegtada ama bogga internetka ee Xafiiska Gardoonka Ka-faa'iideysataha Medicare.

Jaangooyada § 416.50(a)(3): Soo gubinta iyo baaritaanka cabashooyinka

(ii) Dhammaan xadgudubyada/cabashooyinka eedaynta la xiriirta, balse aan ku xaddidnayn, si xun ula dhaqmidda, dayaca, xadgudbka afka ah, dhimirka ah, galmada ah, ama jireed waa in si buuxda loo diiwaangeliyaa.

(iii) Eedaymaha oo dhan waa in si degdeg ah loogu soo sheegaa qof mas'uul ah oo jooga xarunta ASC.

(iv) Eedaymaha la xaqiijiyay oo keliya waa in loo soo sheegaa maamulka dowladda ama maamulka degaanka, ama labaduba.

Jaangooyada § 416.50(b): Adeegsiga xaquuqda iyo xushmaynta hantida iyo qofka

(4) Haddii maxkamad awood u leh ay go'aamiso bukaanka in uu yahay qof aan karti lahayn iyada oo la raacayo sharciyada bedqabka iyo caafimaadka ee gobolka, xaquuqaha bukaannada waxaa adeegsada qof loo magacaabay si waafaqsan sharciga Gobolka in uu wakiil ka noqdo bukaanka.

(5) Haddii maxkamad Gobolka ah aysan go'aamin in bukaanka uusan karti lahayn, wakiil sharci ah kasta ee uu bukaanka u magacaabay si waafaqsan sharciga Gobolka ayaa adeegsan kara xaquuqaha bukaanka ilaa xadka uu oggol yahay sharciga Gobolka.

Jaangooyada § 416.50(c): Asturnaanta iyo Bedqabka.

Bukaanka wuxuu xaq u leeyahay –

(2) In uu daryeel ku helo goob ammaan ah.

Jaangooyada § 416.50(c): Asturnaanta iyo Bedqabka.

Bukaanka wuxuu xaq u leeyahay –

(3) In uu ka xorroobo dhammaan noocyada xadgudubka ama dhibaataaynta.

Qoraalka Caddeynaya Xaquuqda uu Leeyahay Bukaanka



HADDII AAD QABTID CABASHO AMA ASHTAKO KU SAABSAN HAY'ADDA AMA QOFKA KU SIINAYA ADEEGYADA QALLIINKA BUKAANSOCODKA, WAXAAD WACI KARTAA, WARQAD U QORI KARTAA, AMA BOOQAN KARTAA XAFIISKA CABASHOYINKA XARUNTA CAAFIMAADKA, WAAXDA CAAFIMAADKA EE MINNESOTA. WAXAAD SIDOO KALE ULA XIRIIRI KARTAA GARDOONKA DARYEELKA MUDDADA DHEER.

**Waaxda Caafimaadka ee Minnesota,
Xafiiska Cabashooyinka Xarunta Caafimaadka**
(651) 201-4201
1-800-369-7994
Fakiska: (651) 281-9796

Xafiiska Gardoonka Daryeelka Muddada Dheer
(651) 431-2555
1-800-657-3591
Fax: (651) 431-7452
www.mnaging.org

Cinwaanka Boostada:
Gardoonka Daryeelka Muddada Dheer
PO Box 64971
St. Paul, MN 55164-0971

Cinwaanka Boostada:
Waaxda Caafimaadka ee Minnesota,
Xafiiska Cabashooyinka Xarunta Caafimaadka
85 East Seventh Place, Suite 300
P.O. Box 64970
St. Paul, Minnesota 55164-0970

Gardoonka Ka-faa'iideystaha Medicare
1-800-MEDICARE (1-800-633-4227)

<http://www.cms.gov/center/special-topic/ombudsman/medicare-beneficiary-ombudsman-home>